



WAXAAN AADAYAA CHILDREN'S MINNESOTA OO WAXAAN KU  
SOO MARAYAA SAWIR AMA CT AH WADNAHA.





Sawirka ama CT ah wadnaha  
waa raajo casri ah oo dhakhtarka  
ku caawineysa in baaris ahaan  
wax looga ogado wadnaha  
iyo qulqulka dhiigga xididdada.


Carruurta da' kasta ayaa la  
saari karaa sawirka CT. Sawirku  
wax dhib ah ma laha oo waa  
wax degdeg ah. Halkan waxaa  
kuugu qoran siyaabaha kala  
duwan ee loo qaado sawirka CT.

Maalinta ka horreysa ballanta  
sawirka ama CT, waa in la joojiyo  
cuntada ama cabbista ay ku  
jirto kafaa'iinka sida kafeega,  
soodhada ama shukulaatada.

Maalinta baarista, waxaa xoogaa  
biyo ah lagu soo qaadan karaa  
daawada subaxii ee caadiga ah.

Goor hore waa in aan kaco si  
aan u cuno quraac yar, ka dibna  
waa in aan joojiyo cuntada iyo  
cabitaanka saddex saac ka hor  
wakhtiga baarista.





Marka la soo gaaro wakhtiga ballanta, waa inay waalidku ilmaha keenaan Children's Minnesota. Marka la yimaado isbitaalka, waa in la iska soo xaadiriyo Miiska Soo-dhaweynta.


Waxaa idiin imaan doona kalkaaliye caafimaad oo ilmaha u diyaarin doona sawirka ama CT. Qofka kalkaaliye ah ayaa idiin sharxi doona sawirka CT oo su'aalo ayaad weydiin kartaan.





Kalkaalisada ayaa i geyneysa dabaqa 4aad ee isbitaalka. Ka dibna, waxaan la galayaa meel la yiraahdo 'PAR4' oo darbiyada loogu xardhay sawircacmeed!

Waxaa ilmaha la saari doonaa  
miisaan si loo ogado  
culeyska jirkooda.





Miisaanka ka dib meel darbi  
ah ayaa lagu cabbirayaa  
dhererka ilmaha. Caag dhuuban  
ayaa si tartiib ah loogu  
taabanayaa madaxa marka laga  
cabbirayo dhererka.

Qof kalkaaliye ah ayaa  
waalidka iyo ilmaha u sii  
kaxeyn doona qolka la  
isugu diyaariyo sawirka  
ama CT. Waxay ilmuhi  
guriga ka soo qaadan  
karaan alaaboo uu ku  
madadaasho inta loo  
diyaarinayo sawirka, sida  
boombale yar, alaab kale  
oo lagu ciyaaro, buug  
ama shaashad xalleefsan.





Waxaa cumaacunta ama  
lugta hoose loogu xirayaan  
calaamad ah magaca ilmaha.  
Calaamaddu waa macluumaad  
muhiim u ah sawika ah CT ee  
ilmaha la saari doono.

Marka xigta, waa in  
ilmaha loo geliyo  
dharka isbitaalka si  
loo saaro sawirka CT.





Qofka kalkaaliyaha  
ah ayaa qalab ku  
dhageysanaya wadnaha  
iyo naqaska.

Kalkalisada ayaa gacanta ilmaha wax ugu xiri doonta, oo waa qalab dhowr ilbiriqsi lagu eegi doono heerka cadaadiska dhiigga iyo garaaca wadnaha. Waa in uusan ilmuhi is dhaqaajin.





Kalkaalisada ayaa markaas ka dib cirbad faleebbe ah ku mudeysa gacanta ama lugta ilmaha. Cirbadda faleebbaха waa caag yar oo dhuuban oo xidid la gelin doono. Waa caag aad u yar oo dhuuban.

Kalkalisadu waxay gacanta  
ilmaha gelineysaa cinjir buluug  
ah, oo waa calaamad diyaarsan.

Calaamaddaas waxaa lagu  
arkayaa xididdada, oo waxay  
muuqanayaan iyagoo buluug ah.



Marka xigta, kalkaalisaada ayaa maqaarka ku nadiifin doonta aalkolo qoyan oo wax yar qabow. Wuxuu la isticmaali karaa buufis ama kareem lagu kabuubyeynayo maqaarka, meesha la mudayo. Kabuubyeyntu waa si aan wax xanuun ah loo dareemin, oo xanuunka cirbadda faleebba ah waa sidii qandhufo oo kale. Buufiska kabuubyada keena waa wax dhawaaq sameynaya oo aan xanuun lahayn. Waxay qaadan doontaa dhowr daqiqiyo si ay maqaarka u kabuubyeyso.





Waxa ay ku xiran tahay daawada kabuubyada, balse waxaa la dareemi karaa qandhuufo yar oo laga dareemayo xididka yar. Marka cirbadda yar caaggeeda la geliyo xididka, cirbadda ayaa laga soo saaraya. Kalkaalisada ayaa dul saari doonta sharooto faleebba si ay jirka ugu dhejiso. Hadduu rabo ilmuhi wuxuu daawanayaa ciyaar, buugaag, taleefashin ama shaashad xalleefsan. Marar qaarkood, carruurta qaar ayaa heeso qaada ama hadal kale ayaa lagu mashquuliya.



Mararka qaarkood dhakhtarka ayaa amri kara in uu wadnaha ilmaha xoogaa garaac ah sameeyo inta la sawirayo, oo waa hab lagu arki karo xididdada yaryar ee wadnaha. Waxaa baarista ka hor ilmaha la siin karaa daawo, oo waa kaniin yar oo biyo lagu laqi doono. Daawadaas wax xanuun ah ma laha haba yaraatee oo lama dareemi karo.

Kalkaalisada ayaa  
ilmaha ku kaxeyneysa  
kursiga curyaanka si ay  
ugu geysso mashiinka  
sawirka. Waalidku qolka  
mashiinka ayey u soo  
raaci karaan, balse waa  
in ay ka baxaan oo ay ku  
sugaan qol kale oo ku  
dheggan ilaa iyo inta uu  
daqiiqado yar sawirku  
ugu soo dhammaado.





Mashiinka sawirka waxa uu u eg yahay wax weyn, oo furan, oo leh qaab ah tuubbo. Wuxuu leeyahay nalal iftiimaya, oo ilmaha ayaa kala dooran kara midabka ay rabaan! Wuxuu ilmuu la kulmi doonaa shaqaalah ka qaadaya sawirrada wadnaha. Waa lala hadli doonaa ilmaha inta ay baaristu u socoto oo su'aalo ayaa la weydiin doonaa.



Waa inuu ilmuhu dhabar-dhabar ugu seexdo sariirta mashiinka.  
Sariirta ayaa gudaha u galeysa godka oo hadba ka soo baxaysa,  
markaas ayaa ilmaha suun dhexda ama lugaha loogu xirayaan.



Shaqaaluhu waxay wax ku dhejin karaan xabadka iyo cududda si  
loogu tiriyo garaaca wadnaha.




Marka xigta, shaqaalaha ayaa ilmaha u sheegaya in uu gacmaha ka hoos mariyo madaxa. Sababtu waa in gacmahayga laga fogeeyo qeybta wadnaha ah ee la sawirayo. Wuxuu kale oo ilmaha loo sheegi doonaa dhowr ilbiriqsi oo ah qaadashada neef la isku celinayo.

Shaqaalahay ayaa  
faleebbahay ku xiraya  
mashiin gaar ah oo  
daawadu ka soo  
baxayso. Waxaa  
faleebbahay lagu  
tijaabinayaa biyo ah  
cusbo yar (oo dareere  
ah), oo ah wax qabow.  
Dareenka qabowga ah  
waa wax la dareemayo  
laakiin wax dhib ah  
ma laha.





Sariirta mashiinka ayaa hadba u soconeysa horay iyo gadaal. Mashiin gaar ah ayaa ilmaha laga siin doonaa daawada lagu arkayo xididdada gudaha. Jirka ayaa xoogaa kululaan doona, oo waxaa la dareemi karaa sidii iyadoo la isku kaadinayo! Shaqaalahaa ayaa u sheegi doona marka ay neefta isku celin doonaan si looga qaado sawirka wadnaha – oo badanaa waa hal ama laba jeer.



Dabadeedna shaqaalaha  
ayaa qol yar geli doona  
oo qaadi doona sawirrada  
wadnaha. Kalkalisada iyo  
dhakhtar ayaa sidoo kale  
joogi doona qolka yar.  
Waxa ay maqlayaan oo  
ay mar kasta kaamarad ku  
arki karaan sawirrada  
la iga qaadayo. Sidaan  
ayey u eg tahay qeybta  
hore ee mashiinka.

Waxa keliya ee uu ilmuuhu ku  
jirayo qolka mashiinka waa  
ilaa 15 daqiiqo, ka dibna  
kalkaalisada iyo waalidka  
ayaa u imaan doona.





Kalkaalso faleebbaa ka saareysa ayaa ka cabbireysa cadaadiska dhiigga iyo garaaca wadnaha. Waxaa ilmaha la siinayaan cunto fudud oo dharkii uu xirnaa ayaa loo gelinayaan. Waa in ilmaha la siiyo biyo aad u badan baaristu marka ay u soo dhammaato ka dib.

Wakhti yar ka dib,  
ballantu sidaas ayey ku  
dhammaaneysaa oo guriga  
ayaa la aadayaa. Sawirka  
CT waa hawl fudud oo aad  
muhiim u ah!





Sawirrada raajadan casriga ah waxaa dhakhtarka loogu diri doonaa hab shaashad ah, oo waxaa looga dhigi doonaa sawirro ah dhinac kasta ama 3D. Dhakhtarka ayaa ballanta kale waalidka tusi doona sawirradii oo dhan.

**SI AAD U QABSATO BALLANTA CT EE WADNAHA AMA WIXII SU'AALO AH,**  
fadlan kala soo xiriir Children's Heart Clinic 612-813-8800.

